



PORLAND PUBLIC SCHOOLS

501 N Dixon | Portland, OR 97227 | www.pps.net | pubinfo@pps.net | (503) 916-2000

Rabshadaha Qoriga Loo Adeegsado oo Ka Sii Socda Agagaarka Dugsiyadeena

Bulshadda Qaaliga ah ee PPS,

Habeenimadii Sabtida, rasaas ayaa ka dhacday bannaanka Dugsiga Sarre ee Franklin halkaasi oo ay ka socdeen tartankii ciyaaraha kubada koleyga dugsiyada degmadu. Nasiib wanaag, rasaastaasi cidina kama soo gaadhin dhaawac halis ahi iyada oo qofkii lagu tuhunsanayay hadda gacanta ku hayaan ciidamada nabadgelyadu, laakiin haddii aad haysaan wax macluumaad ah oo ku saabsan dhacdadani fadlan waxaad wacdaa telefoonka 503-823-3333 ama waxaad isticmaashaa khadkan fariimaha qarsoodiga lagu reebo [SafeOregon tipline](#).

Iyada oo dhacdadani ay dhacday maaliantii sabtida ahayd, ayna ka dhacday bannaanka dhismaha dugsiga, waxaanu ka mahadcelineynaa inay ciidanka boolisku ay markiiba goobta soo gaadheen iyaga oo si degdeg ah uga jawaabay, sidoo kalena waxaa garab siinayey kooxda nabadgelgeyada ee Dugsiyada Dadweynaha Portland.

Waxaan sidoo kale wali aqoonsanahay inay tani tahay dhacdo naxdin leh oo cabsi galisay dadkii goobta ku sugnaa meeshii ay ciyaarto ka socotay. Sidii aan hore idinla wadaagnay waqtigi lagu jiray fasixii xilliga jiilaalka, waxaan leenahay [nidaamyo dhammaystiran](#) oo aan ku qiimeyno cagojugleynta/handadaadda in si degdeg ah tallaabo loo gaaro go'aan ilaalinaya nabadgelyada ardayda ku sugaran dhismayaasha dugsiyadeena.

Fadlan maalmaha soo socda waxaan idiiin soo direynaa fariimo dheeraad ah, laakiin waqtigan xaadirka ah, waxaan rabnaa inaan idinla wadaagno labo waxyaabood oo degdeg ah kuwaasi oo cusub.

Ugu horeyn, fasalada waxay casharadoodii u qaadan doonaa waqtiyadii caadiga ahaa ee jadwalkooda. La-taliyaasheena, shaqaalaha bulshada, iyo khabirada cilmi-nafsiga waxay ku sugnaan doonaan beri oo dhan dhammaan dugsiyada. Xubnaha Guusha Ardeydeena iyo kooxda ka soo kabashada dhibaatada Caafimaad waxa ay ka shaqeyn doonaan sidii ay u caawin lahaayeen dugsiyo gaar ah. Shaqaalaha xirfadlayaasha ah waxay ka taageeri doonaan macluumaadka dhibaatada maskaxeed ee ay keenaan khataruhu arday kasta oo raba in lagu xiro qof weyn oo la aaminsan yahay. Waxaan kale oo aan leenahay [agabyada rabashadaha bulshada](#) kuwaasi oo loogu talogalay qoysaska raba inay helaan agabyo dheeraad ah oo ka baxsan dhismayaasha dugsiyada.

Marka labaad, waxaan dardar galin doonaa wada-hadalada ka dhexeeya Magaalada Portland iyo Ciidamada Nabadgelyada Booliska Dugsiyada(PPB) sidii kor loogu qaadi lahaa ilaalinta dugsiyada dariska si degdeg ah. Haddii aanu nahay Dugsiyada Degmada, waxaanu sii wadeynaa meelmarinta tallaabooyin dheeraad ah oo lagu ilaalinayo nabadgelyada iyo xoojinta nabadgelyada bannaanka ee dhammaan ciyaaraha kubada koleyga, oo ay ka mid yihiin inay ku sugnaadaan shaqaale dheeraada ah oo dhinaca nabadgelyada dhismayaasha Dugsiyada Dadweynaha Portlanad, saaxiibada bulshada ee dugsiyada la shaqeeya, iyo ciidamada booliska.

Haddii aanu nahay macallimiinta, waxaan ugu baaqaynaa hoggaamiyaasha la doortey ee magaaladeena, ciidamada amniga, iyo nidaamayada cadaaladu inay mudnaanta siiyaan qorshayaasha horumarinta nabadgelyada dariska sidii looga hortagi lahaa inay sii socoto rabshadaha qoriga ee loo adddeegsanayo caruurteena, dhallinyaradeena, qoysaskeena, iyo darisyada. Sidii uu yiri I todobaadkii la soo dhaafay, waxaan diyaar u nahay inaan kala shaqeyno dadaalada xal loogu helayo cid kasta oo wax ka qabanayso arrimaha ku saabsan nabadgelyada.

Daacadnimo,



Guadalupe Guerrero

Superintendent